Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad** | **Muqdisho, 31 December 2025** | **Lr.4**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# DECEMBER

# 2025

**SHARCI LR.43** **TAARIIKH: 15-TA DISEEMBAR 2025**

**SHARCIGA DHISIDDA HAY'ADDA MAALGASHIGA JFS**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0800/B11/25**, ku taariikheysan **08/12/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Sharciga Dhisidda Hay'adda Maalgashiga JFS.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dhisidda Hay'adda Maalgashiga.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
31 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-093-2025
TAARIIKH: 31-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

# JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha *XFS*

**2025**

# CUTUBKA 1AAD – HORDHAC

## Qodobka 1$^{aad}$

## Magaca Xeerka

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 2$^{aad}$

## Erey Bixin

Xeerkan marka la joogo

**"Hay'ad"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Maalgashiga Soomaaliya.

**"Guddi"** waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee Hay'adda Maalgashiga Soomaaliya.

**"Sumcadda Soomaaliya"** waxaa loola jeedaa magaca iyo fahamka caalamiga ah ee laga haysto JFS.

**"Golaha Wasiirrada"** waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 97$^{aad}$ ee Dastuurka JFS.

**"Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka"** waxaa loola jeedaa micnaha ku qeexan Qodobka 17$^{aad}$ ee Sharcigan.

**"Maalgashade Ajnebi ah"** waxaa loola jeeda shirkad ama qof ajnebi kaas oo hanti maalgashi ku sameeyay, kana diiwaangashan JFS, waxaa sidoo kale soo gelaya qof Soomaali ah oo maalgashiga ku diiwaangashaday/gashatay dhalasho dal kale.

**"Maalgashi"** waxaa loola jeedaa adeegsiga hanti ama ra'sumaal lagu aas-aasayo ama lagu ballaarinayo hawl ganacsi, taasi oo laga filayo faa'iido.

**"Maalgashade dalka u dhashay"** waxaa loola jeeda shirkad ama muwaadin u dhashay JFS kaas oo hanti maalgashi ku sameeyay, kana diiwaangashan JFS.

**"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

**"Wasaarad"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

**"Maamulka Hay'adda"** Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka ee hay'adda oo lagu magacaabay si waafaqsan Sharcigan.

**"Golaha Qaran ee Maalgashiga"** waxaa loola jeedaha Golaha lagu dhisay si waafaqasan Qodobka 12aad ee Sharcigan.

**Qodobka 3aad**
**Ujeeddada Sharciga**

1. Ujeeddada Sharcigan waa;
   a) Dejinta sharci lagu maamulo maalgashiga dalka.
   b) Dhisidda Golaha Qaran ee Maalgashiga.
   c) Yagleelidda hay'ad u xilsaaran dhiirigelinta, soo jiidashada, isku duwidda iyo maareynta maalgashiga iyo sare u qaadidda sumcadda dalka.

## CUTUBKA 2AAD – DIIWAANGELINTA SHAHAADDADA MAALGASHIGA

**Qodobka 4aad**
**Codsiga Diiwaangelinta Maalgashiga**

1. Maalgashade dalka u dhashay iyo mid ajnebi ahba waa in ay usoo gudbistaan hay'adda maalgashiga codsi diiwaangelin maalgashi, ka hor inta aan laga hawlgalin maalgashiga gudaha JFS.

2. Codsiga diiwaangelinta maalgashiga waxaa diyaarinaya isla markaana dib-u-eegis ku sameyn kara hay'adda maalgashiga waxaana laga heli karaa xafiiska hay'adda.

3. Maamulka Hay'adda Maalgashiga waxaa ay ka dalban kartaa maalgashatada macluumaad iyo xog dheeri ah ka hor inta aana go'aan laga gaarin codsigooda.

**Qodobka 5aad**
**Shuruudaha Diiwaangelinta Maalgashiga**

1. Shuruudaha Diiwaangelinta Maalgashiga waa:
   a) in shirkadda maalgashiga laga diiwaangeliyay hay'adaha dowladda ee ku shaqada leh.
   b) in uu soo gudbiyaa codsaduhu codsiga diiwaangelinta maalgashiga oo si rasmi ah, dhameystiran loo buuxiyay.
   c) in xaddiga ra'sumaalka maalgashi ee codsadaha ajnebi ah aanu ka yaraan $200,000 ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

lacag qalaad oo u dhiganta.

d) in maalgashigu aanu ka hor imaaneyn ama liddi ku aheyn shareecada Islaamka, dhaqanka Soomaaliyeed, deegaanka iyo amniga qaranka.

e) in codsaduhu soo bandhigo qorshe deegaanka iyo bulshada haddii mashruucu leeyahay saameyn weyn.

## Qodobka 6aad
## Mudnaanta Maalgashiga

1. Ka hor ansixinta codsiga diiwaangelinta maalgashiga, Hay'adda maalgashiga waxa ay mudnaanta siineysa maalgashiga;
   a) U abuuraya Ummadda Soomaaliyeed fursado shaqo isla markaana keenayo aqoon iyo xirfado dalka ku yar.
   b) Keenayo tiknoolojiyad, farsamo, xirfad casri ah, ama aqoon aan dalka ku badneyn.
   c) Bixinaya canshuur mug leh, si loo kordhiyo dakhliga gudaha ee JFS.
   d) Farsameynaya, warshadeynaya, isla markaana qiimo u yeelayo wax-soo-saarka dalka.
   e) Kor u qaadaya dhoofinta wax soo saarka dalka.
   f) Maalgashiga koronto dhalinta la cusbooneysiin karo (Renewable Energy).
   g) Caafimaadka iyo daawooyinka.

## Qodobka 7aad
## Hab-raaca Go'aanka Codsiga Diiwaangelinta

1. Guddiga Sare ee Hay'adda ayaa go'aan ka gaaraya oggolaanshiyaha iyo diidmada codsiyada diiwaangelinta maalgashiga ee qiimihiisu ka yar yahay $ 100 milyan oo doolar.

2. Haddii codsiga diiwaangelinta maalgashiga uu qiimihiisu gaarayo $ 100 milyan oo doolar Guddiga Sare ee Hay'addu wuxuu u gudbinayaa Wasiirka si uu ugu gudbiyo Golaha Qaran ee Maalgashiga.

3. Haddii codsiga diiwaangelinta maalgashiga uusan dhameystirney, ama ka hor-imaanayo shuruudaha ku xusan Qodobka 5aad ee Sharcigan, Guddiga Sare ee Hay'adda ayaa go'aan diidmo qoraal ah dib-ugu-celinayo codsiga maalgashadaha soo gudbistay, kuna wargelinayo sababaha soo celinta codsiga muddo 3 maalmood gudaheed oo ah maalmo shaqo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## Qodobka 8aad
## Muddada iyo Cusboneysiinta Shahaaddada Maalgashiga

1. Shahaaddada maalgashiga ee lagu qaatay si waafaqsan Sharcigan Qodobbadiisa 5aad & 7aad waxa ay dhaqangal tahay muddo shan (5) sano ah, laga billaabo taariikhda la bixiyay.
2. Haddii ay dhammaato muddada dhaqangalka shahaaddada maalgashiga isla markaana uu maalgashaduhu la kulmo shuruudaha diiwaangelinta maalgashiga, si waafaqsan Sharcigan Qodobbadiisa 5aad & 7aad, waxaa u furan in uu dib-u-cusbooneysiisto shahaaddada maalgashiga muddo shan (5) sano ah.

## Qodobka 9aad
## Wareejinta Shahaaddada Maalgashiga

Shahaaddada maalgashiga waxa la wareejin karaa marka laga helo Hay'adda Maalgashiga oggolaansho qoraal ah Guddiga Sare ee Hay'adda Maalgashiga.

## Qodobka 10aad
## Laalidda Shahaadda Maalgashiga

1. Guddiga Sare ee Hay'addu aya laali kara shahaaddada maalgashiga haddii;
   a) ay caddaato in shahaaddada lagu bixiyay maclumaad aan run aheyn ee uu bixiyay maalgashadaha amaba lagu bixiyay nidaam aan waafaqsaneyn hab-raaca shahaado maalgashi bixinta.
   b) uu maalgashaduhu buriyay shuruudaha maalgashiga.
   c) hay'addu waa in ay qoraalka go'aanka laalidda shahaaddada maalgashi u dirtaa maalgashadaha ay khuseyso muddo 30 cisho ah kadib marka la laalo shahaaddada, kuna xusta sababa laalidda.

## Qodobka 11aad
## Ka Cabashada Go'aamada

1. Qofkii codsado shahaaddada maalgashiga ee loo diido ama kan shahaaddada laga laalayba waxa ay Wasiirka u gudbin kaaan racfaan ku aaddan go'aamada Guddiga ee la xiriira diidmada bixinta ama laalidda shahaddada maalgashiga, muddo ku siman 30 cisho gudahood.
2. Xeernidaamiye ayaa lagu soo saari doona hab-raaca racfaan qaadashada iyo dib-u-eegista



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

go'aamada Guddiga Sare ee Hay'adda ee la xiriira diidmada bixinta ama laalidda shahaddada maalgashiga.

## CUTUBKA 3AAD – GOLAHA QARAN EE MAALGASHIGA

### Qodobka 12aad

### Dhisidda Golaha Qaran ee Maalgashiga

Iyada oo siyaasiyan muhiimad mug leh la siinayo maalgashiga dalka, sharcigan waxa lagu aas-aasay Golaha Qaran ee Maalgashiga oo ka kooban xubnaha hoos ku xusan.

1. Ra'iisul Wasaaraha Xuukuumadda Federaalka Soomaaliya oo noqonaya Guddoomiyaha Golaha Qaran ee Maalgashiga.
2. Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha oo noqonaya Guddoomiyaha ku xigeenka Golaha.
3. Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha.
4. Wasiirka Arrimaha Dibadda.
5. Wasiirka Maaliyadda.
6. Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
7. Wasiirka Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada.
8. Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee JFS.
9. Guddomiyaha Guddiga Sare ee Hay'adda Maalgashiga.
10. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Maalgashiga Somaliya, ahna Xoghayaha Golaha Qaran ee Maalgashiga.

### Qodobka 13aad

### Xilka iyo Awoodaha Golaha Qaran ee Maalgashiga

Xilka iyo Awoodaha Golaha Qaran ee Maalgashigu waa:

1. Soojeedinta Hindisaha siyaasadaha, shuruucda iyo qorsheyaasha maalgashi ee jaangoyneya mashariicda maalgashi iyo qeybaha dhaqaale ee hor-tebinta u leh maalgashiga iyaga oo tix-raacaya warbixinta iyo soo jeedinta hay'adda una gudbiyaan Golaha Wasiirrada Federaalka Soomaliya.

2. Kor-joogtaynta wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda ee uu khuseeyo maalgashiga iyo xaqiijinta wadashaqeyntooda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

3. Dhiirigelinta iskaashi dhex mara dowladda iyo maalgashatada si loo horumariyo, isla markaana loo fuliyo siyaasadaha la xiriira maalgashiga dalka.

4. Xallinta khilafaadka iyo is-qabsiga ka dhex dhasha hay'adaha dowladda ee la xiriira maalgashiga, ee lagu xallin kari waayay hay'adaha dhexdooda.

5. U olo-oleynta caalamiga ah ee maalgashiga dalka.

**Qodobka 14aad**
**Kulamada Golaha**

1. Goluhu waxa uu yeelanaya kulamo caadi ah iyo kuwo aan caadi aheyn, oo uu iskugu yeerayo isla markaana guddoominayo Guddoomiyaha Goluhu, kuna qabsoomaya xarunta hay'adda ama meshii kale ee uu Guddoomiyaha Goluhu go'aamiyo.

2. Kulamada Golaha waxa ay ku ansaxayan aqlabiyad fudud 50+1.

3. Kulamada Golaha waa in uu qabsooma sannadkiiba labo (2) jeer ugu yaraan, xaaladaha caadiga ah.

4. Golaha ayaa dejin doona xeer-hoosaadkiisa kaas oo qeexaya dhammaan arrimaha lagama maarmaanka u ah kulamadooda iyo go'aamadooda.

5. Go'aamada Golaha waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad fudud 50+1, haddii ay sinmaan waxaa kala rajaxaya Guddoomiyaha Golaha.

**Qodobka 15aad**
**Dhisidda Hay'adda**

1. Sharcigan waxaa lagu dhisay Hay'adda Maalgashiga Somaliyeed oo xarunteeda dhexe noqonayso magaalada Muqdisho ee caasimada Dalka waxeyna xarumo/xafiisyo ku yeelaneysaa Dhammaan Caasimadaha Dowlad Goboleedyadda xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ee JFS isla markaana noqonaysa hay'ad shaqadeeda u madax bannaan.

2. Hay'addu waxa ay yeelaneysa:
   a) Shaqsiyad qaanuuneed, shaabbad iyo astaan u gaar ah.
   b) Awood ay wax ku dacweyso laguna dacweyo.
   c) Awood ay ku tasarufto isla markaana ku geli karto heshiis ama ka qayb-qaadato macaamil



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kale oo kasta, si waafaqsan Xeerka.

## Qodobka 16aad
## Xilka iyo Awoodaha Hay'adda

Xilka iyo Awoodaha hay'addu waa:

1. In ay ka shaqeyso iskuwidda iyo qaabeynta maalgashiga gudaha, dhiirigelinta, soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah iyo sare u qaadidda sumcadda dalka.
2. Hagaajinta jawiga maalgashig dalka si loo ogaado caqabadaha ku gedaaman maalgashiga iyo guud ahaan kobaca dhaqaalaha si loo dhiirigeliyo maalgashiga dalka iyo horumar dhaqaale waara.
3. Sameynta wadatashi ballaaran oo u dhaxeeya dowladda, ganacsatada, ururada rayidka ah iyo hay'adaha caalamiga ah si loo helo talooyin ku aaddan maalgashiga iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka.
4. Go'aaminta maalgashiga iyo qeybaha (sectors) dhaqaale ee furan (positive list) iyo kuwa xiran (negative list).
5. Ansixinta codsiga diiwaangelinta maalgashiga.
6. In ay ka gacan siiyaan maalgashatada helitaanka adeegyada ay bixiyaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyada oo wakiil uga noqoneysa dowladda iyo maalgashatada fududeynta bixinta adeegyada sida.
   a) Dal-ku-galka/Dal-ku joogga (Visa/Permit)
   b) Ruqsada Shaqaalaha (Work permit)
   c) Shatiyada/ruqsadaha Wasaaradaha kala duwan
   d) Diiwaangelinta & wax ka beddelka shirkadaha maalgashatada
   e) Talo so jeedinta Bixinta canshuur dhaafka maalgashiga

   Adeegyada sare ku xusan waxa ay hay'addu ka gacan siineysa maalgashatada kadib marka ay soo buuxiyaan dhammaan shuruudaha Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya ee bixinaya adeegyada si loogu helo oggolaanshiyo iyo adeegyada ay u baahanyihiin maalgashatadu.

7. ay qabato, haysana diiwaanka codsiyada diiwaangelinta maalgashiga.
8. ay bixiso Shahaaddada maalgashiga.
9. ay taageero joogto ah siiso maalgashatada ka dib marka ay yagleelaan maalgashigooda, gudaha dalka, si waafaqsan xeerarka dalka.
10. ay joogtayso uruurinta xog tayaysan oo la xiriirta maalgashiga dalka, iyada oo kaashanaysa

hay'adaha dawladda.

11. ay u ololeyso xeerar, siyaasado iyo xeer-nidaamiyeyaal lagu hagaajinayo, sarana loogu qaadayo maalgashiga dalka.
12. ay ku lahaan karto wakiilo iyo xafiisyo dalka iyo dibadda.
13. ay sare u qaaddo sumcadda iyo muuqaalka dalka JFS.
14. ay dhiirigeliso maalgashiga Aaggaga Dhaqaale ee gaarka/xorta ah.
15. ay dhiirigeliso maalgashiga kheyraadka dabiiciga ah sida shidaalka, gaaska, iyo macdanta noocyadeeda kala duwan.
16. ay diyaarisaa mashariicda qaran ee maalgashiga.

## Qodobka 17aad
## Xiriirka Hay'adaha Dowladaha Xubnaha ka ah DFS

Hay'addu waxa ay wadashaqeyn joogto ah la yeelaneysa Wasaaradaha iyo hay'adaha dowlahada xubnaha dowladda Federaalka ee uu khuseyo maalgashiga.

## Qodobka 18aad
## Qaab-dhismeedka Hay'addas

1. Qaab-dhismeedka hay'adda waxa uu koobanyahay;
   a) Guddiga Sare ee Hay'adda iyo
   b) Maamulka Hay'adda.

## Qodobka 19aad
## Xilka iyo Awoodaha Guddiga sare ee Hay'adda

Xilka iyo Awoodaha Guddiga waa in uu:

1. Kor-joogteynta hab-sami u socodka howlaha iyo wax-qabadka Maamulka Hay'adda
2. Jaangooyaa hiigsiga, aragtida, ujeeddada iyo qiyamka asaasiga ah ee Hay'adda.
3. In ay ansixiyaan isla markaana korjoogteeyaan istaraatijiyadda iyo qorsheyaasha guud ee Hay'adda una gudbiyaan Wasiirka.
4. Ansixiyo qaab-dhismeedka maamulka iyo hay'adda.
5. Ansixiyo miisaaniyadda iyo xisaab-xir sannadeedka Hay'adda una gudbiyo Wasiirka.
6. Ansixiyo ama diida diiwaangelinta/cusbooneysiinta codsiga maalgashiga, si waafaqsan Sharcigan iyo tilmaamaha siyaasadda ee Xukuumadda Federaalka ah iyo shuruucda dalka.
7. Hubiyo u hoggaansanaanta maalgashatada ee shuruucda maalgashiga JFS.

8. Go'aamiya wax ka beddelka shaabbadda iyo Astaanta Hay'adda.
9. Soo saaraan xeer-hoosaadka shaqada Guddiga.
10. Magacaabo Agaasime Waxeedyada Hay'adda, ka dib marka uu helo soo jeedinta Agaasimaha Guud ee Hay'adda oo la tashaday Wasiirka.

## Qodobka 20aad
## Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Guddiga Sare ee Hay'adda waxa uu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood, oo lagu soo xulayo si waafaqsan Qodobka 21aad farqaddiisa (b).

2. Agaasimaha Guud ee hay'adda ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 30aad, waxa uu xilka uu hayo awgiis ku noqonayaa xog-haynta Guddiga Sare.

## Qodobka 21aad
## Shuruudaha Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Shuruudaha xubnaha Guddiga Sare ee Hay'addu waa in:

a) uu yahay muwaaddin Soomaaliyeed oo deegaankiisa rasmiga ahi yahay JFS. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxaa furan in xubin uu ka noqon karo qof ajnabi ah, haddii sumcad iyo xiriir maalgashi oo calami ah looga maarmi waayo.
b) uu aqoon gaar ah u leeyahay mid ka mid ah: dhaqaalaha, sharciga, suuq-geynta, warbaahinta/xiriirka dadweynaha, siyaasadda dowladda, maamulka, horumarinta ganacsiga, maaliyadda iyo qorsheynta dhaqaalaha.
c) uu waayo-aragnimo shaqo oo aan ka yareyn shan (5) sano u leeyahay mid ka mid ah aqoonta ku xusan xarafka (b) ee Qodobkan.
d) aysan maxkamad ku helin dambi taabanayo sharafta ammaanada.
e) uu dhimir ahaan badqabo.

## Qodobka 22aad
## Hannaanka Magacaabista Guddoomiyaha/Ku-xigeenka iyo Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Wasiirku, isaga oo sameynaya wadatashi ballaaran, ayuu usoo jeedinaya Golaha Wasiirada murrashaxiinta Guddiga iyo Guddoomiyaha Guddiga Sare/Ku-xigeenka ee Hay'adda, si



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

waafaqsan Qodobka 21aad si loo tixgeliyo, loona ansixiyo.

2. Ka dib ansixinta Golaha Wasiirada, Ra'iisul Wasaaraha XFS ayaa u gudbinaya go'aanka ansixinta, Xubnaha Guddiga, Madaxweynaha JFS, si uu ugu soo saaro Xeer Madaxweyne magcaabista isla markaana lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah.

**Qodobka 23aad**

**Xilka iyo Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga**

1. Xilka iyo Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga waa;
   a) Ku dhawaaqidda, iskugu yeeridda, iyo guddoominta shirarka Guddiga
   b) Isku xirka hay'adda iyo Golaha Qaranka ee Maalgashiga
   c) Mas'uuluyadda hoggaamminta, kormeerka iyo kor-joogteynta howlaha Guddiga iyo Guddi
   d) Hoosaadyada Guddiga si loo xaqiijiyo yoolalka hay'adda.
   e) Ilaalinta maamul wanaagga iyo ku dhaqanka xeer-hosaadka guddiga.
   f) Xaqiijinta wadashaqeyn iyo xiriir hufan in uu ka dhaxeeyo Guddiga iyo Maamulka Hay'adda.
   g) Kala rajax aadda haddii uu codadku sinnado.
   h) U Gudbinta go'aannada Guddiga jihooyinka ay khuseyan.

**Qodobka 24aad**

**Muddo-xileedka iyo Waayidda Xilka Guddoomiyaha**

1. Si waafaqsan Qodobka 25aad ee Sharcigan, muddo xileedka Guddoomiyaha Guddigu waa Shan (5) sano ah oo halmar loo cusbooneysiin karo.

2. Guddoomiyaha Guddiga waxa uu ku waayi karaa xilka marka uu;
   a) si rasmi ah qoraal is-casilaad ah u gudbiyo Wasiirka, lagana aqbalo.
   b) geeriyoodo.
   c) uu gaaro/gaarto da'da howl-gabka.
   d) waayo mid-ka-mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay.

**Qodobka 25aad**

**Muddo-xileedka iyo Waayidda Xubinnimada Guddiga Sare ee Hay'adda**

1. Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'addu waxa ay xilka haynayaan muddo shan (5) sano ah oo halmar loo cusbooneysiin karo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Xubinnimada Guddiga Sare ee Hay'adda waxa lagu waayi karaa marka uu;

a) Si rasmi ah qoraal is-casilaad ah u gudbiyo Guddoomiyaha Guddiga, lagana aqbalo.
b) Geeriyoodo.
c) Waayo mid-ka-mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay, si waafaqsan Qodobka 22[aad].

## Qodobka 26[aad]
## Kulamada, Guntanka iyo Codaynta Guddiga Sare ee Hay'adda.

1. Guddiga waxa uu yeelanaya kulamo caadi ah iyo kuwo aan caadi aheyn oo ku qabsoomaya xarunta hay'adda ama meshii kale ee uu Guddoomiyaha Guddigu go'aamiyo.
2. Kulamada Guddiga waxa ay ku ansaxayan marka ay xaadiraan Seddex meelood oo Labo (2/3). Haddii la waayo 2/3, kulanka xiga waxa uu ku qabsoomaya aqlabiyad fudud 50+1.
3. Kulamada Guddiga waa in uu qabsooma sannadkiiba afar jeer ugu yaraan, xaaladaha caadiga ah.
4. Guddiga ayaa dejin doona xeer-hoosaadkiisa kaas oo qeexaya dhammaan arrimaha lagama maarmaanka u ah kulamadooda iyo go'aamadooda.
5. Go'aamada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad fudud 50+1.

## Qodobka 27[aad]
## Xuquuqda Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'adda

Xubnaha Guddiga waxa ay yeelanayaan gunno lagu jaan-gooynayo fadhiyada Guddiga oo uu go'aamiyo Wasiirku.

## Qodobka 28[aad]
## Mabaadi'da Maamul Wanaagga

1. Guddiga waa in uu mabaadii'da maamul wanaagga hay'adeed ku dabbaqaan Hay'adda, waana inay xaqiijiyaan in marka ay qabanayaan hawlaha la xiriira Hay'adda ay;

a) u dhaqmaan si xilkasnimo leh iyaga oo tixgelinaya waajibaadkooda masuulnimo;
b) aanay u dhaqmin qaab keenaya cabashooyin la xiriira iska horimaad dhanka danta ah; iyo
c) inay si degdeg ah ugu dhawaaqaan arrin kasta oo ay og yihiin taasi oo wax u dhimi karta awoodooda inay si daacadnimo ah u gutaan xilkooda si waafaqsan Xeerka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 29aad
## Maamulka Hay'addaMaalgashiga

Maamulka Hay'adda waxa uu ka koobanyahay Agaasimaha Guud, Ku-xigeen, Agaasime Waaxyo, Madax Qaybeedyo iyo Shaqaale hoosaad, si waafaqsan Sharcigan iyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 30aad
## Hannaanka Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka Hay'adda.

Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka waxaa lagu soo magacaabayaa iyadoo la raacayo Qodobbada 21aad iyo 22aad ee Sharcigan, iyo si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah.

## Qodobka 31aad
## Xuquuqda Agaasimaha Guud iyo Agaasime ku Xigeenka ee Hay'adda

Mushaarka iyo gunnooyinka Agaasimaha Guud, iyo Agaasime Ku-xigeenka waxaa lagu jaangoynayaa xuquuqda saraakiisha dowladda ee shaqaalaha rayidka.

## Qodobka 32aad
## Xilka Agaasimaha Guud ee Hay'adda

1. Agaasimaha Guud waa in;
   a) uu masuul ka noqdaa maamulka Hay'adda ee maalinlaha ah.
   b) uu hoggaamiyo, kor-joogteeyo waaxyaha iyo shaqaalaha kala duwan ee Hay'adda;
   c) diyaarinta iyo fulinta miisaaniyadda, istaraatjiyadda iyo hab-raacyada maamul ee hay'adda.
   d) xaqiijiyo in Hay'addu yeelato qaab-dhismeed maamul oo wax-ku-ool ah iyo qorshe kala-guur;
   e) isku xiro Maamulka Hay'adda, Guddiga Sare iyo Wasaaradda.
   f) uu u yahay xog-hayaaha Golaha Qaran ee Maalgashiga
   g) xaqiijinta, kor-joogteynta iyo habsami u socodka howlaha maamulka iyo maaliyadda hay'adda
   h) fulinta dhammaan go'aamada Golaha Qaran ee Maalgashiga iyo Guddiga Sare ee Hay'adda, iyo waajibaadkii kale ee ay u xilsaaran, sida bixinta shahaaddada maalgashiga iyo laalideedaba.
   i) Matalaadda hay'adda marka ay la galeyso hay'ado kale oo dhiggeeda ah, halka Wasiirka Wasaaraddu gelayo heshiisyada labo-geesoodka (bilateral) ah iyo kuwa dhinacyada badan

(multilateral).

j) U gudbiyaa Wasiirka warbixin sanadkiiba laba mar iyo mar kasta oo uu ka dalbado Wasiirka.

**Qodobka 33aad**

**Waayidda iyo Muddo Xilka Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka Hay'adda.**

1. Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka hay'adda waxa ay xilka hayn karaan mddo shan (5) sano ah waxaana loo cusbooneysiin karaa mar kale.
2. Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa, inta aysan dhammaan mudada xil-hayntooda waxa ay ku waayi karaan xilka xafiiska haddii;
   a) Si rasmi ah qoraal is-casilaad ah ugu gudbiyo Guddiga Sare ee Hay'adda, lagana aqbalo.
   b) Geeriyoodo.
   c) Uu gaaro/gaarto da'da hawl-gabka.
   d) Guddiga Sare ee Hay'adda soo jeediyo xil ka-qaadis, Wasiirka iyo Golaha Wasiiraduna ay ku qancaan soo-jeedinta Guddiga Sare.
   e) Waayo mid-ka-mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay.

**Qodobka 34aad**

**Shaqaalaha Hay'adda**

Hay'addu waxay shaqaalaysiin kartaa shaqaale cusub iyada oo lagu saleynayo qaab-dhismeedka hay'adda iyo baahiyaha taagan, waxaana loo raacaya Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

## CUTUBKA 4AAD – ARRIMAHA MAALIYADEED

**Qodobka 35aad**

**Misaaniyadda iyo Ilaha Dhaqaale ee Hay'adda**

1. Hay'adda waxa ay qoondo miisaaaniyadeed sannadle ah ku yeelaneysaa miisaaniyadda qaranka.

2. Hay'addu waxa ay boqolkiiba hal (1%) ku yeelaneysa faa'iidada maalgashiga ajaanibta, taas oo uu hirgelin doonaan hay'adaha ay khuseyso.

3. Hay'addu waxa ay ku yeelanaysaa xisaab rasmi ah Banigaga Dhexe ee JFS, waxa ayna koonto bangi oo dheeraad ah ku yeelan kartaa bangiyada gaarka loo leeyahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 36aad
## Xisaabaadka

1. Hay'addu waa inay leedahay buug xisaabeed iyo diiwaan sax ah oo la xiriira dakhliga maaliyadeed iyo kharashka, kaasi oo la jaanqaadaya hannaanka xisaabaadka maaliyadda dowladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Waa in xisaabaadka hay'adda oo sax ah isla markaana dhammaystiran sannad walba hay'addu u gudbisa hantidhawrka dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Ka dib xisaabaadka hantidhawrka maray ee sannadka oo uu soo ansixiyay hantidhawruhu, Guddigu waa inay xaqiijiyaan in xisaabaadkaas la daabaco oo ay dadweynuhu ku heli karaan saddex bilood gudahood ka dib ansixinta.
4. Sannad xisaabeedka Hay'adda waxa uu lamid yahay sannad maaliyadeedka Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 37aad
## Ku takri falka Hantida Hay'adda

1. Dhaqaalaha iyo hantida Hay'addu waa hanti dadweyne, waana in loo adeegsado si taxaddar leh iyada oo la tixgelinayo mabaadi'da maaliyadda dowladeed ee ku dabbaqmaya xafiisyada dowladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Marka lagu ogaado hannaan cadaaladeed in Guddiga, xubin kamid ah, ama sarkaal ka tirsan Hay'adda uu si aan habboonayn u isticmaalay dhaqaalaha, hantida ama khayraadka Hay'adda, tallaabo anshax-marin iyo ciqaab ayaa laga qaadanayaa si waafaqsan shuruudda Xeerka ee ku aaddan ciqaabta falkan isdabamarin ee noocan oo kale ah.

# CUTUBKA 5AAD – QODOBBO KALA DUWAN
## Qodobka 38aad
## Baabi'in

Waxaa halkan lagu baabi'iyay Sharciga Maalgashiga Shisheeye ee 2015.

## Qodobka 40aad
## Dambiyada iyo Ciqaabaha

Qofka kasta oo si ulakac ah u gudbiya maclumaad uu ku marin-habaabiya hay'adda si uu u diiwaangeliyo maalgashi ama u helo adeegyada hay'adda waa dambiile waxaana lagu ganaaxaya, ganaax aan ka badenyn lacag u dhiganto seddex kun iyo shan boqol doolar ($3,500) ama xarig aan ka badneyn seddex sano iyo badh ama labadaba.

## Qodobka 41aad
## Xeer-nidaamiyeyaasha

Wasiirku waxa uu soo saarayaa xeer-nidaamiye lagu dhaqan-galiyo Sharcigan.

## Qodobka 42aad
## Dhaqan-gal

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE